



Barnaamijka Cunnada Bilaashka ah ee Iskoollada Minnesota

Barnaamijka Cunnada Bilaashka ah Iskoollada Minnesota wuxuu bixiyaa maalgelinta gobolka iyo federaalka ah kaasoo u oggolaanaya dhammaan ardayda inay helaan hal quraac oo bilaash ah iyo hal qado oo bilaash ah maalmaha iskoollada jiro iyagoo ku sugan iskoollada ka qaybgalo Barnaamijka Qadada ee Iskoollada Qaranka iyo Barnaamijka Quraacda Iskoollada (National School Lunch Program iyo School Breakfast Program).



Maxaa ku jira Barnaamijka Cunnada Bilaashka ah ee Iskoollada Minnesota (MN)?

Ardaydu waxay maalin walba iskoollada ka heli karaan hal quraac oo bilaash ah iyo hal qado oo bilaash ah. Ardaydu waa inay qaataan cunto ah mid dhammaystiran.

- Quraac ahaan: Ardaygu waa inuu doortaa ugu yaraan saddex shay, oo ay ku jiraan nus koob (1/2) ah miro ama khudaar.
- Qado ahaan: Ardaygu waa inuu doortaa ugu yaraan saddex qaybood oo cunto kala duwan ah, oo ay ku jiraan nus koob (1/2) ah miro ama khudaar.



Haddii ardaygu uusan qaadan cunto dhammaystiran, koontada ardayga waxaa lagu soo dallici doonaa cuntada ama cabitaannada uu qaatay.



Maxaa KU JIRIN Barnaamijka Cunnada Bilaashka ah ee Iskoollada Minnesota (MN)?

libsashada hal shay ma ahan bilaash oo sidoo kalena cuntooyinka aan dib laga gudi karin lacagtii ku baxday ma ahan bilaash. Tusaale ahaan waxaa ka mid ah:

- kartoona yar ee caanaha
- cuntada fudud ee baakadeysan
- cunto labaad
- Quraac labaad ama qado labaad
- Cuntooyinka aan buuxin shuruudaha ugu yar ee laga doonayo
- Cuntada la siiyo macallimiinta, shaqaalaha, iyo dadka kale ee waaweyn



Miyaan weli u baahanahay inaan buuxiyo Arjiga Dheefaha Waxbarasho?

Haa, muhiim ayay u tahay qoysasku inay buuxiyaan Arjiga Dheefaha Waxbarasho. Arjiyada Dheefaha Waxbarasho waxay go'aamiyaan maalgelinta uu iskoollada ilmahaagu u helayo barnaamijyada iyo kabidda waxbarashada.